

Raadraaca Xiriirka ee Cudurka COVID-19

Waa maxay raadraaca xiriirka?

Raadraaca xiriirka wuxuu gacan ka geystaa joojinta faafinta cudurka iyadoo:

1. La ogeysiinayo xiriirka dhow ee u-baylah noqday COVID-19 iyo la siinayo tilmaamo loogu talagalay karantiilka.
2. Laga diiwaangelinayo xiriirka dhow (Sara Alert™) si loola socdo calaamadaha.

Yaa ah xiriir dhow?

Qof kasta oo u jirsaday 6 cag qof qaba COVID-19 muddo 15 daqiiqo ama ka badan ah.

Yaa sameeyo raadraaca xiriirka?

Gudaha Maine, raadraaca xiriirka waxaa sameeya hawl-wadeenada ku sugan Xarunta Xakameynta iyo Kahortagga Cudurka (Maine CDC) iyo iyadoo kaashanaya xarumaha kale.

Sababta uu muhiim u yahay?

Raadraaca xiriirka wuxuu ku wargeliyaa dadka u-baylah noqoshadooda COVID-19. Dadka ka ag dhowaa qof qaba COVID-19 waxay u badan tahay inuu ku dhaco cudurka.

Inkastoo raadraaca xiriirka, Maine CDC ay si dhakhso leh u aqoonsan karaan dadka isku arka calaamado ayna kula talin karaan inay baaritaan iyo go'doon.

Maxaa loo sameeyaa raadraaca xiriirka?

Dadka qaarkood waxaa ka soo muuqan kara dhowr calaamado ama ma muujiyaan calaamado, balse si fudud ayay weli u qaadsiin karaan fayraska dadka kale iyadoo ka warheyn.

Dadka kale, COVID-19 wuxuu u horseedi kartaa cudur daran ama dhimasho, gaar ahaan dadka waaweyn iyo dadka qaba xaaladaha caafimaad ee jira.

Sidee loo aqoonsadaa xiriirada?

Maine CDC waxay aqoonsataa xiriirada iyadoo loo marayo baaritaanka kiisaska la xaqiijiyay iyo suurtagalnimada kiisaska COVID-19. Baaruhu wuxuu ka qaadaa macluumaad xiriirrada dhow ee la siiyay kooxda raadraaca xiriirka.

Sidee ayuu raadraaca xiriirka u shaqeeyaa?

1. Diiwaangeliyayaasha raadraaca xiriirka ayaa wacaan shaqsiyaadka lagu aqoonsadey baaritaanka kiiska si ay:
 - a. Ugu wargeliyaan ka ag dhowaanshaha ay la sameeyeen qof qaba COVID-19.
 - b. Uga diiwaangeliyaan raadraaca xiriirka si loo hubiyo astaamahooda maalin kasta.
 - c. U bixiyaan macluumaadka karantiilka.
 - d. U siiyaan warqad shaqo-bixiyaha taasoo dhigaysa in laga codsaday inay sameeyaan karantiil.

- e. Ka caawiyaan ku xirida adeegyada bulshada si loo siiyo taageero marka lagu jiro karantiilka.

*Maine CDC ma u sheegayaan cidda u aqoonsatay iyaga xiriir dhow ahaan.

Waa maxay Sara AlertTM

Maine CDC waxay isticmaashaa Sara AlertTM, qalab laga galo mareegta, si uu uga caawiyo la socoshada astaamaha xiriirka dhow ee COVID-19. Dadka laga yaabo inay u-baylah noqdeen COVID-19 waxay ka warbixin karaan astaamaha iyadoo loo marayo mareegta, farriin gaaban, iimaylka, ama wicitaan iswada. Dadka ka diiwaangashan Sara AlertTM waxay helayaan fariimo maalin kasta si ay uga warbixiyaan inay qabaan astaamaha COVID-19. Tani waxay si dhakhso ah loogu aqoonsanayaa in dadku u-baylah noqday COVID-19 ay jirradeen si Maine CDC u siin karto hagid qof kasta oo ka soo warbixiya astaamaha.

Wax badan ka ogow Sara AlertTM halkan www.saraalert.org.

Sidee ayaan u gaan karaa inay isoo wacayaan Maine CDC oo uusan ahayh wicitaan huu-haa ah?

Maine CDC **KUMA warsan doonaan** macluumaadka koontada bangiga, lambarkaaga sugnaanta bulshada, ama xaaladdaada socdaal.

Ma waxaa jira cid kale oo ka socota CDC oo laga yaabo inay isoo wacaan?

Haddii adiga ama dadka kale ee gurigaaga ka tirsan aad iska ag dhow dihiin aadna bilowdo inaad yeelato astaamo, baare kiis ayaa ku sii wici doonna.

Ku saabsan asturnaantaada

Haddii Maine CDC ku soo wacaan, waxay kaa warsan doonaan magacaaga, cinwaankaaga, iyo taariikhda dhalashadaada. Tani waxay gacan ka geysaneysaa in la hubiyo in Maine CDC ay aqoonsan karto shaqsiyaadka oo aysan qof ku khaldin qof u magac, cinwaan, ama da' eg. Macluumaadkaan si gaar ah ayaa loo xafidaa, sida diiwaanka caafimaadka.

Macluumaadka gala Nidaamka Sara AlertTM waxaa kamid ah taariikhda dhalashada iyo cinwaanka. Waxaa la tirtiraa 14 maalmood kadib markaad dhammeyso karantiilka ama go'doominta. Waxaad codsan kartaa xogtaada inaan la gelin Nidaamka Sara AlertTM. Haddii aad codsato inaad wadaagin macluumaadka, kooxda ayaa sii wadi doontaa inay kula socdaan iyadoo aadan heleyn farriimo ka socda Sara AlertTM. Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad ka jawaabin su'aalaha nafis-darro kugu ridaya.

Helitaan Luuqadeed

Turjubaano ayaa la heli karaa haddii la codsado. Maine CDC waxay la shaqeysaa dad fududeeya dhaqamada si ay u hubiso in la buuxiyo baahiyaha dhaqameed iyo luuqadeed.

